
# Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha
# Waaxda Ganacsiga iyo Horumarinta Suuqgyada

***Heshiiska Aagga Ganacsiga Xurta ah ee Afrika***

**May 2025**



***Horudhac***

Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Afrika, waa heshiis ganacsi ay ku midieysanyihiin dhammaan wadamada xubnaha ka ah midowga Afrika. Heshiiskan waxa uu qeyb ka yahay qorshaha 2063, kaas oo la rabo in qaaradda oo dhan ay yeelato hal suuq (Single market) iyo in Afrika la gaarsiiyo hrumar waara oo loo dhanyahay. Heshiiska waxaa lagu saxiixay Kigali, Rwanda, Maarso 2018. Soomaaliya, waxaa u saxiixay Wasiirki hore ee Wasaarada Arimaha dibadda Soomaaliya Ambasador Ahmed Isse Awad, isaga oo wakil ka ahaa Madaxweynihii hore Soomaaliya, Mudane Mohamed Abdullahi Farmajo.

Heshiiskan waxaa ay golaha Wasiirada Soomaaliya ansixiyeen labo mar xukuumadii hore ayaa ansixisay 2020 iyo Xukuumada hada ee Danqaran oo ansixisay 2022 ilaa hada waxaa uu horyaalaa golaha shacabka oo aan wali ansixinin.

Heshiiskaan waxaa ansixiyay 47 wadan, waxaana wali an ansixinin oo golahooda aan marinin 8 wadan oo kaliya **Benin, Liberia, Libya, Madagascar, Somalia, South Sudan, Sudan, Iyo Eritrea.**

***Ujeedooyinka Waaweyn ee Heshiiska waxaa kamid ah:***

- In la isku furo suuqa badeecadaha iyo adeegyada ee qaaradda, iyada oo loo maraayo kulamo wadahadalo
- In uu heshiisku fududeeyo isku socodka dadka, lacagta (Capital) si loo dhiiri geliyo maalgashiga qaaradda dhexdeeda ah iyo guud ahaan urur goboleydyada dhaqaale ee qaaradda.
- In la dhiso aas-aaska tilaabada soosocota ee Midowga fudooyinka qaaradda, in la dhiiri geliyo hanaan dhaqan dhaqaale ee waare, sinaanta jinsiga
- In xal loo helo caqabadaha isku laalaabka kamid noqoshada urur goboleeydo badan, taas oo u gogol xaareysa In la helo hal suuq, hal urur ee qaaradda dhexdeeda ah.

***Ujeedooyinka gaarka ah ee heshiiska waxaa kamid ah:***

- ✓ In Meesha laga saaro gebi ahaan caqabadaha canshuuraha badeecadaha iyo caqabadaha aan canshuurta aheyn.
- ✓ In gebi ahaanba la furo adeegyada ganacsiga, la iska kaashado maalgashiga, xaquuq maskaxeedka (IP) iyo siyaasadda tartanka suuqyada.
- ✓ In la dhiso hanaan lagu xaliyo muranada ka dhasha heshiiska.
- ✓ In la dhiso hey’adaha ka shaqenaaya maamulka iyo dhaqan gelinta heshiiska.

***Waa maxay member state, state parties iyo non-sate parties?***


**Member states**: Heshiiskan waxa uu ka dhaxeeya dhamaan Wadamada xubnaha ka ah ururka midowga Afrika. **State parties**: Waa wadamada saxiixay isla markaana ansixiyay heshiiska, kuwaas kaliya ayaa hela xaquuqda iyo waajibaadka heshiiska. **Non-State parties**: waa wadamada saxiixay heshiiska isla markaana aan ansixin, wadamadaas oo ay Soomaaliya kamid ah tahay malahan xaquuq iyo waajibaad ee heshiiska ah.

***<u>Heshiiska meeqo qeyb ayuu ka koobanyahay?</u>***

Heshiiskan waxa uu ka koobanyahay borotokoolada kala ah, Ganacsiga badeecadaha, ganacsiga adeegyada, ilaalinta hanti maskaxeedka, siyaasadda tartanka iyo borotokoolka maalgashiga. Wadahadalada heshiiskan waxaa loo qeybiyay labo weji. Wejiga kowaad waxaa laga wada hadlay borotokoolka ganacsiga badeecadaha, ganacsiga adeegyada, iyo sidoo kale hanaanka xalinta muranada heshiiska (dispute settlement mechanism). Wejiga labaad waxaa diiradda lagu saaray borotakoolka Maalgashiga, hanti maskaxeedka iyo siyaasadda tartanka. Waxaa lagu daray weji seddexaad oo looga hadli doono Ganacsiga habka online ka ah (E-Commerce).

Borotookalada ganacsiga badeecadaha, adeegyada iyo hanaanka xalinta muranka heshiiska waxa uu dhaqan gal noqday 30 May 2019, kadib markii ay ansixiyeen heshiiska 22 dal sida uu dhigaayo Qodobka 23aad ee heshiiska. Hase yeeshee, weli waxa aan la dhameestirin dokumintiyo muhiim u ah dhaqangalka borotokooladaa sida, xeerka asal ahaanta badeecadaha (Rules of Origin), jadwalka canshuuraha isla ogolka ah, (schedules of tariff concessions) iyo jadwalka gaarka ah ee balanqaadka ganacsiga adeegyada gaar ahaan qeybaha hortabinta leh (Isgaarsiinta, Adeegyada farsamada ah, Maaliyadda, Gaadiidka iyo Dalxiiska).

***Sawirka 1aad: Qaabdhismeedka Heshiiska***




***Waa kuma hey'adaha masuulka ka ah fulinta heshiiska iyo sida ay u dhusanyihiin***

Hey'adaha masuulka ka ah fulinta iyo go'aan ka gaarista heshiiska waxa ay u dhisanyihiisan sidan hoose:-


- **Golaha guud ee Madaxweynayaasha** midowga Afrika iyo xukuumadahooda. Waxa ay leeyihiin korjoogteyn iyo jiheynta istiraatiijiyad ee heshiiska.
- **Goloaha Wasiirada gancsiga** ee wadamada Qaaradda Afrika, ama wasiirka kale ee dowladu soo xulato in uu qeyb ka noqdo. Waxa ay leeyihiin awood ah in hubiyaan in si sax ah loo dhaqangeliyo loona fuliyo qorshaha heshiiska. Ayaga ayaa qaadan kara go'aankasta oo lagu dhiiri gelinaayo in la gaaro ahdaafta heshiiska. Golaha Wasiirada

waxa ay warbixin doonaan Golaha madaxweynayasha Afrika, iga oo u marsiinayana guddiga fulinta ee midowga Afrika.

- **Guddiga Khubarada Ganacsiga**; Waxa ay ka koobanyihiin xooghayyaasha ganacsiga ee wasaaradaha ganacsiga ee dalalka Afrika, ama xilka u dhigma. Waxa ay fulinyaan go'aanada golaha wasiirada, sidoo kale waxa ay dajinayaan qorshayaasha ay ku shaqeyneyso lagu fulinaayo heshiiska. Waxa ay dabogal ku sameynayaan hanaanka loo fulanaayo heshiiska.
- **Xogehyenta AfCFTA** oo ah hey'ad joogta ah oo madax banaan taas oo masuul ka ah maamulka, taageerida, iyo isku xirka dhammaan qeybaha kala duwan ee hey'adaha. Xarunteeda Accra, Ghana. Xogahaya joogtada hadda waxaa ah Wamkele Keabetswe Mene uu ah muwaadin South Africa.
- **Golaha xalinta Muranada** ganacsiga, kaas oo masuul ka ah in uu dhageesto, ka taliyo xaliyo muranada ganacsiga ee u dhaxeeya wadamada xubnaha ka ah heshiiska.


Borotakoolada kala duwan ee heshiiska waxa uu dhisayaa heerar kala duwan oo guddiyo iyo guddi hooseedyo oo a shaqeynaya fulinta heshiiska.

Sa***wirka 2aad: Guddi hoosaadyada borotakoolka Ganacsiga Badeecadaha***




***Sawirka 3aad: Guddi hoosaadyada borotakoolka Ganacsiga Badeecadaha***

Ganacsiga adeegyada gaar ahaan qeybaha hortabinta leh (Isgaarsiinta, Adeegyada farsamada ah, Maaliyadda, Gaadiidka iyo Dalxiiska), waxa uu ka koobanyahay illaa 5 guddi hoosyaadyada sida ku cad shaxanka hoose.



***Goorma ayuu bilaabanayaa dhaqangalka iyo isku socodka Ganacsiga badeecadaha iyo Adeegyada?***

Heshiiska waxa uu dhaqan galayaa kadib 30 maalmood, marka ay ansixiyaan 23 dal, balse isku socodka ganacsigu waxa uu bilbaan karaa, kadib marka ay dhameestirmaan dhammaan dokumintiyada sharci ee dhameestiraya heshiiska, sida Xeeka asal ahaanshaha badeecada IWM.

***Heerkee ayuu marayaa wadahadalada ganacsiga badeecadaha iyo adeegyada?***

Nidaamka canshuurta mudnaanta leh ee borotakoolka ganacsiga badeecadaha, waxaa muhiim ah dhowr dokuminti oo aan weli la dhameestirin wada hadalkooda, waxaa kamid ah xeerka asalka, hanaanka tayada badeecadaha (Standard, phyto-sanitary standards, and technical barriers to trade), hanaanka maamulka furdoonyinka, hanaanka fududdeynta ganacsiga (trade facilitation). Wadahadalada socda waxaa weli la isku fahmi la'yahay xeerka Asalka badeecadaha (Rules of origin). Xureynta badeecadaha waxaa loo qeybiyay 90% in gebi ahaanba la xureeyo oo la dhimo canshuuraha saran, 7% in laga dhigo badeecado dareen leh (sensative) isla markaana 10 sano gudahood lagu xureeyo, iyo ugu danbeyn 3% wadankasta uu xur u yahay in uusan ku darin badeecadaha la xureynaayo. Inta badan wadamada ansixiyay heshiiska waa ay gudbiyeen badeecadaha ay suuqa kaga qeyb galayaan.

July 2018, madaxda midowga Afrika, waxa ay soo saareyn in ganacsiga adeegyada diiradda lagu saaro 5 qeybood oo hortabin u leh suuqyada qaaradda waxa ayna kala yihiin, adeegyada farsamada, isgaarsiinta, maaliyadda, maalgashiga iyo gaadiidka. Waxaa hadda gebin gabo maraaya dhameestirka dokumintiga ballanqaadka gooniga ah (Specific Commitment). Waxaana loo qabtay in lagu soo gabangabeeyo 31 june 2022. Wadamada gudbiyay dalabkooda ku aadan adeegyada ganacsiga 46 dal oo aysan Soomaaliya kujirin.

***Booska Soomaaliya ee kamid noqoshada heshiiska.***

Soomaaliya, waxa ay kamid tahay wadamada saxiixay heshiiska islla markaana qeybta ah dhammaan wadahadalada socda ee qeybaha kala duwan heshiiska. Soomaaliya waxa u saxiixay heshiiska Wasiirkii hore ee Arimaha dibadda iyo iskaashiga caalamiga Ambadasor Ahmed Isse Awad, isaga oo ku metelaayay Madaxweynihii hore ee Soomaaliya Mohamed Abdullahi Farmaajo.

Wasaaradda ganacsiga iyo Warshadaha oo ka masuul ah dejinta, iyo fulinta siyaasadda ganacsiga, waxa ay masuul uga aheyd dowladda ka qeyb gal wadahadalada socda. Wasaaraddu waxa ay ku guuleysatay in ay turjunto heshiiska isla markaana la helo Nuqul ku qoran Afka Soomaaliga. Wasaaraddu waxa ay heshiiska horgeysay golaha wasiirada August 2020. Kadib, waxa aan u gudbinay Golaha shacabka ee baarlamaanka soomaaliya. Kadib marka uu dhamaaday mudo xileedka baarlamaankii 9aad, gudoomiyihii hore ee golaha waxa u dib ugu soo celiyay xukuumadda xilgaarsiinta ee Ra'iisul wasaare Mohamed Hussein Rooble. Mar kale waxa

aan horgeeynay Xukuumadda Ra'iisul Wasaare Xamze Cabdi Barre oo iyaguna mar kale ansixiyay isla markaana u gudbiyay Golaha shacabka.

***Waa maxay tilaabooyinka hortabinta leh ee la rabo in aan qaadno?***

- Maadama ay golaha wasiirada ogoladeen in la ansixiyo, tilaabada ugu horeysa, waa in aan geynaa golaha shacabka isla markaana la ansixiyaan lana dhameestiro tilaabooyinka sharciyadeed ee ka mid noqoshada heshiiskan.
- Waa in aan u dirnaa casuumaad rasmi ah Xogahaya guud ee AfCFTA, si uu ula kulmo, madaxda saree ee dalka, iyo dhammaan daneeyayaasha heshiiska sida, ganacsatada, bulshada rayada IWM. Taas waxa ay naga caawineysa in aan ku soo jiidno indhaha dadka sida heshiiskaan uu muhiim u yahay.
- Waa in aan sameynaa ollola badan oo aan ku gaarsiineyo dhammaan daneeyaasha heshiiskan, isla markaana aan u qabano aqoon iswaydaarsi badan si ay ufahmaan si dhawna ula socdaan heerarka heshiiska.
- In lagu tabobaro saraakiisha Wasaaradaha nagala shaqeeya fulinta siyaasadda ganacsiga heshiiska iyo qeybihiisa kala duwan, si ay ugu fududaato fulintiisa.

*End*